

Dacwad Xareynta Wasaaradaa Waxbarashada ee Minnesota

Filing a Complaint with the MDE, Somali version

Inta aadan dacwad xareyn, heya'dda PACER waxey kugula talineysa in aad marka hore telefon, e-mail ama qoraal kula xiriirto isku-duwaha arimaha waxbarashada gaar-ahaneed ee degmada dugsiga. Waxaa laga yabaa in aad xal u hesho walwalka aad qabto adigoo meel sare gaarin oo dacwad xareyn.

Hadii aad meel hoose xal ku heli weyso walwalka aad qabto, tirada soo socota waa kuwa kaa caawini kara qorista dacwada ee Wasaarada Waxbarashada ee Minnesota.

**Tixraacyada hoos ku qoran oo idil waa kuwo quseya Qorshaha Waxbarashada Gaar-ahaneed (Individualized Education Program IEP) Howlaha Qorshaha Gaar-ahaneed ee Qoyska (Individual Family Service Plan IFSP) iyo Qorsho Dhexdhexaadin gaar-ahaaneed ee ka dhexeeya hey'adaha (Individual Interagency Intervention Plan IIIP).*

Tiro-raaca Dacwadda:

Dacwadaada qoraalka ah waa in ay ka mid ahadaan kuwan hoos ku qoran:

- Tariiqda malinta, magacaaga, cinwaanka i-meylka (hadi ay surowdo) iyo raqamka telefonka laga heli karo hadu qofka baarista sameynaya kaaga baahdo akhbaaro siyaado ah
- Magaca ardeyga, cinwaanka guriga (haduu ka duwan yahay kaad degentahay), fasalka ilmahu marayo, iyo waqtiga dhalashada.
- Magaca degmada dugsiga, magaca dugsiga, iyo cinwaanka dugsiga.

Bayaan cadeynaya dambiga lagaa galay: Cadee sabta aad u aaminsantahay in sharci goboleed ama federali ah loo gafay, dambigana dhacay sanadkii la soo dhafay gudahiiis.

- Ahmiyadda saar xaqiiqada dhacday, iyo dadka ka mid ahaa.
- Tiri inta dambi aadaminsatahay in uu dugsigu galay.

Bayaan ah xaqiiqada: Dambi walba, qor tiro ah xaqiiqada saacideysa dacwadda aad qabto.

- Sharax xarakaadka dhacay adoo sheegaya maalmaha ay dhaceen, dadka ka mid ahaa ama aad la xiriirtay iyo sharaxaad kooban oo ah sida ay wax u dhaceen. Ku lifaaq wax walba oo xaqiiqa ah oo dacwadaada saacideysa.

Xalka aad ku talineyso: Tilmaan waxaad ku Ku talineyso in ay xalmarin u tahay dacwadaada.

- Liisgaree xalka aad aqbali karto in lagu xaliyo dacwadaada.

Wasaarada Waxbarashada ee Minnesota MDE Ayaa qabaneysa baaris. Baarista kadib, waxey soo jedineysa ra'yi lagu xaliyo, xalkaad codsatayna wey qadirineysa.

Kobigareynta iyo Dirista

- Saxiix ee tariiqda malinta ku qor dacwadda.
- Samee labo (2) koobi – mid adiga keydso, midna degmada dugsiga sii.
- Kobi dacwadda ah u dir degmada dugsiga Ilmahaaga (qaas ahaan gudoomiyaha waxbarashada gaar ahaneed ama qofka u xil saaran arimaha qaaska ah ee degmada dugsiga; Superintendent). Sharciga federaaliga ah waxuu farayaa, in mar walbood dacwad u direyso Wasaarada waxbarashada ee Minnesota, degmada dugsigana loo diro kobi dacwadda ah.

- Dacwadda boostada ugu dir ama gacanta ugu Gee cinwaankan soo socda:

Horjoogaha Habraaca sharciyeed (Due Process Supervisor)

Minnesota Department of Education

Division of Compliance and Assistance

8161 Normandale Blvd | Minneapolis, MN 55437
952.838.9000 | 952.838.0199 FAX | 800.537.2237 TOLL FREE IN MN

PACER@PACER.org | PACER.org

PACER CENTER 

KOOXDA UGU HOREYSA HALGANKA WAX U OABADKA CARUURTA LAXAADKA LA'A ©

1500 Highway 36 W
Roseville, MN 55413-4266
(651) 582-8725 (fax)

60 casho gudaheed markey heleen dacwadda, dad dacwad baare ah ayaa go'aan ka gaaraya dacwadda. Waa lagula socodsinaaya go'aanka ay garayaan. Hadey qaladaad ku cadadaan, Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota ayaa la imaaneysa ficillo qorsheed ee lagu saxayo qaladaadka. Dugsigu waa in uu ficilka saxidda ah ku dhaqaaqa oo dhameystiro waqti go'an. Hadii wax dambi ah lagu waayo, keyska waa la xiraya. Labada dhinacba (adiga iyo dugsigaba) waad tiigsan kartaan rafcaan, idinkoo ka codsanaya maxkamadda rafcaanka ee Minnesota 60 casho gudaheed.

Tusaalooyin ah dambiyada dhici kara:

- Degmada dugsiga kuma dhameystirin 30 casho gudaheed qiimeynta waxbarashada gaar-ahaneed. 50 casho ayeey degmadu ku qaadatay in ay dhameystirto qiimeynta.
- Malinka fasalka uma fidin waafajinti ku xusneyd qorshaha waxbarashada gaar-ahaneed ee gabadheyda.

Kheyraad

PACER Center
8161 Normandale Blvd.
Bloomington, MN 55437
(952)838-9000
<http://www.pacer.org/disputeresolution/index.asp>

Kheyraadkan daabacan waxaad ka heli kartaa bogga (online). Waxa ka loo kheyraadka ka mid ah, akhbaaro hab-raac sharciyeed ee lagu xaliyo khilafaadka, iyo xiriiriye (link) kugu xiriirinaya bogga Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota (MDE webside). Waxa inta dheer, waxaad soo wici karta oo aad arimaha aad walwalka ka qabto kala hadli karta qof doode (advocate) ah.

Minnesota Department of Education
1500 Highway 36 W.
Roseville, MN 55113-4266
(651)582-8689
<http://education.state.mn.us>

Minnesota Disability Law Center
430 N. First Ave., Suite 300
Minneapolis, MN 55401-1780
(952)337-5970
(612)334-5755 (fax)
www.midmnlegal.org

Dabadeed gabadheyda ma helin caawinaadda qalabeed ee ka cawiya qoraalka oo ay u baahneed.

- Macalinka waxbarashada gaar-ahaneed ee wilkeyga, sadexdi bilood ee la soo dhaafey waxu ku maqna bukaan. Ilmaheyga inta uu macalinku maqnaa, m'a helin kaalmadi waxbarasho ee ku qorneyd qorshahiisa waxbarasho.

Tusaloooyin ah xalalka suuroobi kara:

- Madaama aan qiimeynti waxbarashada gaar-ahaneed lagu dhameys tiri waayey waqtigi loo baahna, waxaan rabaa in hadda la dhameeyo.
- Madaama ilmaheygu isticmali waayey caawinaadda qalabeed ee ka cawiya qoraalka, waxa loo ogalanaya in ay qoralada dib u sameyso si darajo xaqiiqi ah u hesho.
- In ka badan sadexdi bilood ee la soo dhaafey, wiilkeyga ma helin kaalmadi waxbarasho ee waxbarashada gaar-ahaneed. Waa in howlaha loo fuliya si uu uga soo kabsado waqtiga dhaafay oo uusan helin kaalmadi waxbarasho ee waxbarashada gaar-ahaneed.